

Jamhuuriyadda Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Gudd-Deg/ IK/Buur



Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa
Chairman Of District IK/Bur

TIX:- DHH/DIK/1493/2024.
Date:- 07/09/2024.

Ku:- Guddoomiyaha Degmada IK/Buur.

=Hargeisa=

UJ:- Warbixin Dhul.

Mudane Guddoomiye:-

Waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa Warbixinta Dhulkan ku yaalla Degmada IK/Buur xaafadda xeedho, lagana **iibiyey (Faadumo Muuse Cali)** oo leh **TR/No:- (14084)** iyo **(C/Majiid Mustafe Cali)** oo leh **TR/No:- (14083)**.

Hadaba, Mudane Guddoomiye, Goobtan Markii aan Soo Hubiyey Waa **(Dan-Guud)** taasi oo la Tixraacayo Go'aanka Guddida Fulinta Caasimadda, ee Sumadiisu tahay **(Go'aan LR:-16989)** Taasi oo Goobtan lagu Caddeeyey in ay **"Dan-Guud"** tahay Map ahaan iyo Dhul ahaanba.

Sidaasi Awgeed, Mudane Guddoomiye, Waa in la Tirtiro **Dhammaan Faylasha sida Sharci-darrada uga baxay Goobta, iyagoo uu ka baxay Map kale, oo si qaldan loogu Casseeyey Goobtan.**

Allaa Mahad Leh

Eng:- (A/Yaasiin Muxumed Aw Cabdi)
Madaxa Qorshaha Degmada IK/Buur.

Hargeisa.



Jamhuuriyadda Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Gudd-Deg/ IK/Buur



Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa
Chairman Of District IK/Bur

TIX:- DHH/DIK/1496/2024.
Date:- 07/09/2024.

Ku:- Duqa Caasimadda -JSL.
Og;- Xoghayaha Fulinta D/Hoose.
Og;- Ku-xigeenka Duqa Caasimadda.

=Hargeisa=
=Hargeisa=
=Hargeisa=

UJ:- Warbixin Tirtiris Faylal

Mudane Maayor:-

Aniga oo tixraacaya warqadda Sumaddeedu ahayd TIX:- DHH/DIK/1493/2024, kuna taariikhaysan 07/09/2024, ujeeddadeeduna ahayd Warbixin Dhul, kana soo baxday Madaxa Qorshaha Degmada IK/Buur.

Hadaba, Sida uu noo soo Caddeeyey Madaxa Qorshaha Degmadu, Warbixinta Dhulkan ku yaalla Degmada IK/Buur, xaafadda xeedho, lagana iibiyey (Faadumo Muuse Cali) oo leh TR/No:- (14084) iyo (C/Majiid Mustafe Cali) oo leh TR/No:- (14083).

Hadaba, Mudane Maayor, Goobtan Markii aan Soo Hubiyey Waa (Dan-Guud) taasi oo la Tixraacayo Go'aanka Guddida Fulinta Caasimadda, Summaddiisu tahay (Go'aan LR:- 16989) Taasi oo Goobtan lagu Caddeeyey in ay "Dan-Guud" tahay Map ahaan iyo Dhul ahaanba.

Sidaasi Awgeed, Mudane Maayor, Waa in la Tirtiro Dhammaan Faylasha sida Sharci-darrada uga baxay Goobta, iyagoo uu ka baxay Map Kale, oo si qaldan loogu Casseeyey Goobtan.

Allaa Mahad Leh

(Mustafe Ibraahim Aadan)
Guddoomiyaha Degmada IK/Buur

Hargeisa




Ku: Q. Asigoodi

Waxaan joojinaynaa
Laga yaadidoo / Gharacay
Th-rodo ka baxay dhulkan
A-Guud ah.

14/09/2024

**Jamhuuriyada Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Duqa Caasimadda**



**Republic of Somaliland
Municipality of Hargeisa
Mayor's Office**

Go'aan Lr: 658 /2024.

Date: 16th September 2024.

Go'aan Guddi Fulineed: -

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa **16th September 2024**, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargeysa Mudane (**C/kariim Axmed Mooge**), Kuna saabsanayd Tirtirid/Cancelid faylal si sharci daro ah looga sameeyey dhul danguud ah, kuna baxay map kale, Dood & falan-qayn dheer ka dib: -

Markay Arkeen

Sharciga Maamulka Gobolada & Degmooyinka JSL ee Xeer **No: 23/2019**.

Markay Arkeen

Qoddobka **2aad**, farqadiisa **1-aad** ee Xeerka Maamulka Dhulka iyo Magaalooyinka Xeer **Lr: 17/2001**, oo tilmaamaya Awooda Maamulka iyo dhul bixinta ee Dawlada Hoose Hargeysa.

Markay Oggaadeen

Tixraaca warqada sumadeedu tahay **DHH/DIK.1493/2024**, ujeedadeeduna ahayd warbixin dhul, kana soo baxday Madaxa Qorshaha Degmadad Ibraahim Koodbuur.

Tixraaca warqada **DHH/DIK/1496/2024**, ee ku taariikhaysan **7th September 2024**, ujeedadeeduna ahayd warbixin tirtiris faylal, kana soo baxay Gudoomiyaha Degmadda Ibraahim Koodbuur.

Markay Xaqiiqsadeen

In ay lagama maarmaan tahay in la tirtiro faylasha laga sameeyey dhulkaais danta guud ah ee ku yaala Degamadda Ibraahim Koodbuur, gaar ahaan xeedho.


Markay Tixgeliyeen

Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso.

Waxa ay Go'aansadey: -

Ka dib markii ay arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Guddiga fulintu wuxuu Go'aansadey in gabi ahaanba la Tirtiro/Cancel gareeyo faylasha sida sharcidarada ah uga baxay, lagana sameeyey dhul dan guud ah, kuna baxay Map kale oo si khaldan looga caseeyey, faylashaasi oo ah Degmada: **Ibraahim Koodbuur**, gaar ahaan Xaafada Xeedho, kuna kala qoran yihiin: **Faadumo Muuse Cali**, Tr-kiisuna yahay: **14084** & **C/majiid Mustafe Cali**, Tr-kiisuna yahay: **14083**, lagama maarmaan ay noqotay in la tirtiro Tr-ka faylashan si khaldan u baxay.

(Siciid Nuur Jaamac)
Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa



Allah

Mahad

Ieh.

(Khadar Axmed Cumar, Khadar Nuur)
Ku-xigeenka Duqa Caasimada Hargeysa.



(C/kariim Axmed Mooge)
Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Guddi/
Golaha Degaanka Caasimada Hargeysa.

